

Yaad la xiriireysaa marka aad dooneysso in kirada lagaa caawiyo



Photo Credit: CommonBond Communities

Waxaa tahay xubin muhim ah oo ka tirsan bulshadeena. Haddii aad wax dhib ah kala kulanto guriga aad kireysatay, gaarsii dadka si arrintaas wax looga qabto si dhakhso ah.

Mulkiilayaasha guryaha yo maamulayaasha

311

Mulkiilaha guriga (ama maamulaha) ayaa guud ahaan qofka ugu horeya ee aad la xiriireysso. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad u sheegto arrimaha la xiriira dayactirka guriga, si ay u dayactiraan. Nuqlu ka reebo fariimaha idin dhex mara oo qor taariikhaha marka aad caawinaad weydiisatay.

Wac 311 haddii aad wax su'aal ah ka qabto sharciyada guriga, ama aadan wax war ah ka maqal mulkiilaha guriga marka aad codsatay dayactirka, sida biyaha iyo kuleylka, oo waajib ay tahay in degdeg wax looga qabto. Wuxaan ku weydiisaneynaa halka lagaala soo xiriiri karo si shaqaalaha baaraya ula socdaan sida ugu dhaqsaha badan. Wuxaan aad wici kartaa 311 ama warbixintaada ku soo gudbin kartaa: minneapolismn.gov/contact-us/

911

Haddii xaaladda dhismaha ay tahay mid khatar gelineysa naftaada iyo tan dadka kale, ka bax dhismaha oo wac 911.

Xiriiriyaaha Guryaha

HOME Line
yo Legal Aid

Xiriiriyaaha guryaha waxa ay la caawiyaan kireystayaasha, mulkilayaasha guryaha kirada ah iyo mulkiilayaasha kale arrimo dhawr ah oo la xiriira guryaha. Hadii aad guri ama dhisme qolal badan ka kooban oo jabiyeey sharciga oo aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah, la soo xiriir 311 oo u sheeg xiriiriyaaha guryaha, xuquuqda kireystaha aam aargoosashada mulkiilaha guryaha. Waxaa kale oo aad iimeyl u soo diri kartaa shaqaalaha:

HousingLiaisons@minneapolismn.gov

Home Line iyo Legal Aid waxa ay kireystayaasha ka caawiyaan sharciga iyo arrimaha guud ee guryaha, sida guryaha dadka laga saaro, dayactirka, furaha guryaha laga bedelo, Section 8, deebaajiga guryaha, lacagta loo celiyo kireystayaasha, cayayaanka iyo heyb sooca. Haddii aad qabto su'aal xagga sharciga ah, soo wac khadka qarsoodiga ah ee HOME Link ee 612-728-5767 ama soo boqo bogooda internetka ee www.homelinemn.org. Wuxaan aad Legal Aid kala xiriiri kartaa 612-334-5970 ama soo booqo bogga www.mylegalaid.org/get-legal-help. Wuxaan aad caawinaad xagga sharciga ah ka heli kartaa www.lawhelpmn.org/issues/housing.

Waaxda Xuquuqda Madaniga ah

Hay'adaha Xaafadaha

HousingLink

Soo wac Waaxda Xuquuqda Madaniga ah ee 612-673-3012 haddii aad aaminsan tahay in heybsoc laguugu geystay gudaha magaalada Minneapolis.

Waxaa suurogal ah in hay'adaha xaafaduhu kugu xiri karaan adeegyada kala duwan. Hay'adaha xaafadaha waxa aad ka heli kartaa adiga oo soo booqda www.minneapolismn.gov/ncr.

Haddii aad dooneyso hoy cusub, HousingLink waxa ay barta internetka ku soo bandhigaan liiska guryaha dadku awoodi karo ee banaan iyo kuwa la iska diiwaan gelin karo ee Magaalaooyinka Mataanaha Ah iyo Minnesota. Soo booqo www.housinglink.org si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah.



Regulatory Services
Public Service Building
Room 510
505 S. Fourth Ave
Minneapolis, MN 55415

For reasonable accommodations or alternative formats please contact 311. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850. Para asistencia, llame al 311. Rau kev pab 311. Hadii aad Caawimaad u baahantahay 311.